



OGAYSIIIS MUHIIM AH OO KU SAABSAN CAABUQA KORONAFAYRAS(COVID-19) OO LOOGU TALO GALAY DHAMMAAN QAXOOTIGA IYO MAGANGALYO-DOONKA KU NOOL NAWAAXIGA MAGAALOOYINKA

15-ka Maarsio 2020, Dowladda Kenya waxay ku dhawaaqday tallaabooyin gaar ah oo looga hortagayyo faafida Caabuqa Koronafayras(COVID-19). Laga bilaabo, 27-ka Maarsio 2020-ka, **waxaa jira bandow joogta ah inta u dhaxaysa 7-da fiidnimo illaa 5-ta aroornimo**. Lama ogola inaad ka baxdaan guryihiinna inta lagu jiro wakhtigaan, haddii kale waa la idin xirayaa.

Intaa waxaa sii dheer, in 6-da Abriil 2020, Dowladda Kenya ay ku dhawaaqday **inaysan jiri doonin soo galis iyo ka bixitaan Nawaaxiga Magaalada Nayroobi laga billaabo 6-da Abriil 2020** iyo sidoo kale **degmooyinka Kilifi, Kwale iyo Mombasa laga billaabo 8-da Abril 2020**. Ha sameynin isku day kasta oo ah inaad soo gasho ama ka baxdo agagaarkaan haddii kale waa lagu xiri doonaa. Waad ku socsocon kartaa gudaha deegaanka aad ku nooshahay, laakiin hubi inaad xirato maskaraha wejiga marka aad ku sugar tahay goobaha caamka ah.

Shakhsiyadka deggan Agagaarka Magaala-waynta Nayroobi, oo ay ka mid tahay Is-maamulka Caasimada Nayroobi, qayb ka mid ah Degmada Kiambu ilaa Chania River Bridge (Thika), oo ay ku jiraan Rironi, Ndenderu, magaalada Kiambu; Qayb ka mid ah Degmada Machakos ilaa Athi-River, oo ay ku jirto Katani; Qayb ka mid ah Degmada Kajiado oo ay ka mid yihiin Kitengela, Kiserian, Ongata Rongai iyo Magaalada Ngong.

Fadlan haku warwareegin meelaha si micno darro ah dharaartii. Haddii ay daruuri tahay inaad socoto, waa inaad marwalba sidataa warqadahaaga aqoonsiga.

Intas ka sokow, **la soco tilmaamaha** ay soo saartay Dowlada Kenya oo xaqiji inaad u hoggaansanaato.

Lambarrada Gargaarka Degdeggaa ah

- **Diiwaangelinta / xaaladaha degdeggaa ee warqad-siinta:**

Xoghaynta Arrimaha Qaxootiga Shauri Moyo: 0772057770

- **Khadka Caawinta ee UNHCR:**

0800720063 (bilaash ah)

- **Xaaladaha degdeggaa ee Caafimaad:**

NCCK 0704873342 / 0723281362

- **Xaaladaha degdeggaa ee la xiriirta sharciga (sida xiritaan, dhibaatayn boolis):**

Kituo cha Sheria 0721991736

- **Xaaladaha degdeggaa ee maciishada:**

Danish Refugee Council 0800720181

- **Arrimaha la xiriira Caymiska NHIF (Sanduuqa Caymiska ee Isbitaalaadka Qaranka):**

0740049502

Haddii aad leedahay **mid ka mid ah calaamadaha Caabuqa Koronafayras (COVID-19)** sida qandho, qufac, neef-tuur iyo neefsashada oo kugu adkaata, **fadlan kala xiriir Wasaaradda Caafimaadka halkaan 0800721316** (bilaasha ah); 0732353535; ama 0748592558 si laguu hago.